6

Heshiisyada Qoyska

SOM 006

XEERKA QOYSKA IYO DUMARKA DEGGAN ONTARIO

Dumarka oo dhan.
Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Heshiisyada Qoyska

Buugan yar waxaa loogu tala galay in lagugu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Xogtan ma lagu beedeli karo xogta gaarka ah iyo caawinaada qofka loo fidiyey oo sharciga ku saabsan. Haddii arrintaada ay khuseyso sharciga xeerka qoyska, raadso la talin sharci ah sida ugu dhaqsiyaha badan si xaqaada aad u dhacsato. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lagacna aad u siin lahayd, ka fiiriso buugeena yar oo ku magacaaban "sida aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska" oo ku qoran shabakadda www.onefamilylaw.ca.

Heshiisyada qoyska waa kuwo sharci ah oo qeexayo xiriirka ka dhaxeeyo qoyska. Heshiisyada qoyska waxaa ka mid ah heshiisyada wada noolaashaha, heshiisyada guurka iyo kala tagidda. Heshiisyadan labada qof dhexmara waxaa lagu caddeeyaa arrimaha la xiriiraa wada noolaashadiina. Heshiisyadan waxaa kaloo loo sameystaa in lagu caddeeyo xaqqa iyo xuquuqda uu qof kasta leeyahay marka la kala tago.

Heshiisyada qoyska waa in ay qoraal ahaadaan si ay sharci u noqdaan. Labadiinaba waa in aad qof markhaati ah hortiisa ku saxiixdaan. Si wax looga beddelo ama loo buriyo heshiiskan, waa in la maraa sharciga, macnaha waa in qoraal wax lagu beddelo, laguna saxiixo qof markhaati ah hortiisa.

Xuquuq muhim ah ayaa lagu lumin karaa heshiisyada qoyska. Waxaad ku lumin kartaa xuquuqda hantida iyo masruufkaada. Inta aadan saxiixin heshiis kasta oo qoyskaada ku saabsan kolka hore Latasho ruux qareen ah.

Noocyada heshiisyada qoyska ka mid ah

Heshiiska wado noolaashaha

Adiga iyo jaalkaada waxaad kala saxiixan kartaan **heshiiska wado noolaashaha** kolka aad isku soo guurtaan ama ka horba.

Qodobada heshiiska wado noolaashaha waxaa ka mid ah

- sida xiriirkiina uu ahaanaayo, (tusaale ahaan, waxaad ku heshiin kartaan in ay gooni idiin kala ahaado lacagta);
- sida aad ku heshiin lahaydeen kolka uu xiriirkiina idlaado (tusaale ahaan, sida aad u kala qeybsan lahaydeen hantida guriga, iyo masruufka uu bixin doono ruuxa kale inta uu la egyahay). Arrintan waa muhim maxaa yeelay sharciga qoyska ma ku qeexno hantida ay isu celinayaan dadka ku wada nool guur la'aanta. Dadka guur la'aanta ku wada nool marka ay kala tagaan, guriga ay ku noolaayeen wuxuu u harayaa qofka magaciisa uu ku qoran yahay.

Heshiiska wado noolaashaha, kuma qeexna marka hore ciddii qaadan lahayd xannaanaynta iyo ka warqabka caruurtaada. Xannaanaynta, ka warqabka iyo masruufka caruurta waxaa la go'aamiyaa kolka aad adiga iyo jaalkaada kala tagtaan oo keli ah.

Haddii aad is guursataan ruuxa aad ku wada nooleydeen heshiis wado noolaasho ah, heshiiskiinii hore wuxuu noqon doonaa heshiis guur.

Heshiiska Guurka

Heshiiska guurka wuxuu la mid yahay midka wado noolaashaha, laakiin wuxuu dhex marayaa laba qof oo is qabta. Haddii heshiiska uu dhexmaraayo laba qof oo aan weli is guursan waxaa lagu magacaabayaa heshiishka hor-dhaca guurka.

Heshiiska guurka sidaas oo kale wuxuu ka hadlayaa arrimahii ku qornaa heshiiskii wado noolaashaha. Heshiiska guurka ma qeexayo arrimaha xannaanaynta, ka warqabka ama masruufka caruurta. Arrimahan waxaa laga hadli karaa marka la kala tago oo keli ah.

Guriga reerka iyo heshiiska guurka

Haddii aad is qabtaan adiga iyo saygaada, waxaad xaq u leedahay kala qeybsashada hantida reerka, oo ay ka mid tahay guriga aad ku wada nooshihiin. Guriga waxaa lagu magacaabaa **guriga reerka Isqaba**.

Digniin. Waxaad lumin kartaa xaq ayahaada dambe wax u dhimi kara.

Sharciga wuxuu leeyahay adiga iyo saygaadaba xaq ayaad u wada leedihiin in aad isku si ugu wada noolaataan guriga reerkiina. Sharciga wuxuu kaloo leeyahay ruux labadiina ka mid ah ma iibin karo ama dayn kuma qaadan karo guriga ayadoo aan ruuxa kale amar laga haysan. Heshiiska guurka idin dhexyaalo ma beddeli karo qodobkan.

Heshiiska guurka waxaa loo isticmaali karaa si xun oo looga hareer maro xaq aad u muhimsan oo ku saabsan guriga reerka uu leeyahay. Sharciga wuxuu leeyahay adiga iyo saygaadaba nus ka nus ayaad u wada leedihiin qiimaha gurigiina. Kolka aad kala tagtaan waad kala qeybsaneysaan guriga iyo hantida kale oo reerka isla leeyahay iyo wixii dayn ah oo reerka lagu leeyahayba Ruuxa guriga magaciisa ku qoran iyo ruuxa lagacta wada bixiyey waa isku xaq ayuu leeyahay sharciga. Xitaa haddii uu ruux horey guriga u lahaa inta aadan is guursan hadda wuu idinka wada dhaxeeyaa. Saygaada wuxuu kaa codsan karaa in aad saxiixdo heshiis qeexayo in aadan gurigan ama ku kale aadan wax ku lahayn ama xaqqaada uu yahay mid ka yar inta aad yeelan lahayd. Sharciga wuu ogolyahay in sidaa lagu heshiiyo.

Heshiiska kala tagidda

Heshiiska kala tagidda wuxuu ka mid yahay noocyada heshiisyada qoyska. Waxaad isticmaali kartaa heshiiskan marka aad kala tagaysaan adiga iyo saygaada si aad u xallisaan arrimahiina kala tagga ku aadan. Heshiiskan wuxuu idin dhex mari karaa haddii aad sharci isku qabteen ama haddii heshiis wada noolaasho idinka dhaxeeyey. Heshiiskan kala tagga ah waxaad ku qeexi kartaan ciddii xannaanaynta caruurta qaadi lahayd, ciddii ka warqabi lahayd, masruufka caruurta iyo sida loo qeybsan lahaa guriga iyo hantidiisa.

Adiga iyo saygaada waxaad heshiis ku gaari kartaan in aad kala saxiixataan heshiiska kala tagga si aad u xallisaan arrimahiin qaarkood maxaa yeelay:

- in la wada-hadlo way sahlantahay wayna ka dhib yartahay in laysla tago maxkamad
- adigaa ayaa awooda iska leh wixii heshiiska lagu qori lahaa
- waxay u badan tahay in adiga iyo jaalkaadaba aad fulisaan heshiiskan maxaa yeelay idinka ayaa ku heshiiyay qodabadiisa kolkii horaba.

Sidee loo fuliyaa heshiisyada qoyska?

Heshiiskiina qoyska waxaad ka diwaan gelin kartaa maxkamadda. Haddii aad sidaas yeeshid, qodobada ku qoran waxay la mid yihiin go'aan maxkamadda ka soo baxay oo la fulin doono. Waa in aad maxkamadda ka diwaan gelisaa heshiiskiina si aysan dhibaato u dhicin berrito. Haddii heshiiskiina qoyska aad maxkamadda ka diwaan geliso, macnaheedu ma ahan in maxkamadda ay dib u eegi doonto heshiiska. Maxkamadda waxay heshiiska eegi doonta oo keli ah haddii ay dhibaato idin dhex-marto labadiina. Waad ka codsan kartaa maxkamadda in ay kaa caawinto fulinta qodobo ka mid ah heshiiskan.

Badanaa, maxkamadda waxay fulisaa waxa aad ku wada heshiisaan. Inta aadan saxiixin heshiiska qoyska, latasho ruux qareen ah. Iska hubi waxa ku qoran heshiiska. Iska hubi in xuquuqda uu heshiiskan ku siiyey aysan ka duwaneyn xuquuqda aad sharci ahaan u leedahay. Ruuxa qareenkaada ah wuxuu kuu soo heli karaa xogwarran buuxa ee ku aadan dhaqaalaha jaalkaada si aad go'aan fiican uga gaartid heshiiska.

Heshiis aan xaq ku dhisnayn maxkamadda ma beddeleysaa?

Waa in aad maxkamadda ka dacwootaa haddii aad damacdo in aad ka doodo heshiiska qoyska ee idin dhexmaray adiga iyo sayigaada,. La soco, maxkamadaha ma jecla in ay fara geliyaan heshiisyada noocan ah. Xaqaada wax ka yar ayaa lagu siiyey darted maxkamadaha uma fara geliyaan heshiisyada. Sida keli ah ay maxkamadda ku soo fara gelin karto heshiiskiina waxay tahay adiiga oo soo caddeeya:

- in jaalkaada uu ka been abuuray dhaqaalahiisa
- in saxiixa heshiiska lagugu khasbay
- in uu heshiiska yahay mid si xad dhaaf ah cadaaladda uga fog.

Maxkamadaha badanaa ma fara geliyaan heshiiska ku aadan qeybsiga hantida guriga. Waxay u badan tahay in ay wax yar ka beddelaan heshiiska ku aadan masruufka. Maxkamadda waa laga yaabaa in ay heshiiska wax ka beddesho haddii xaaladda hadda aad ku sugantahay ay wax badan ka duwantahay tii ahayd marka aad heshiiskan saxiixeysay.

Haddii heshiiska laysku qabsado, waxaa laga yaabaa in maxkamadda ay qayb heshiiska ka mid ah ay ka saarto halkaas. Haddii qeybtan laga saaray ay tahay midda ugu muhimsan heshiiska oo idil, maxkamadda waxaa laga yaabaa in ay heshiiska oo idil ka dhigto mid aan sharciga waafaqsaneyn. Sidaa haddii ay dhacdo, adiga iyo jaalkaada waa in aad dib u soo heshiisaan, haddii aadan heshiin karin waa in aad maxkamadda ka codsataan in ay idinla xalliso arrimahiina.

Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska oo diyaarka ah:*

1. Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo (SOM 001)
2. Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska (SOM 002)
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta (SOM 005)
6. **Heshiisyada Qoyska (SOM 006)**
7. Gar-qaadida Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn (SOM 008)
9. Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska (SOM 009)
10. Sharciga Xeerka Qoyska sida uu u Qaybiyo Hantida reerka (SOM 010)
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. Masruufka Sayga (SOM 012)

** Buugan waxaa la heli karaa asagoo noocyo kale ah ama luqado kale ku qoran. Fadlan eeg shabakadda www.onefamilylaw.ca si aad u hesho warbixin dheeraad ah. Websaaydkeena waxaad kaloo ka heleysaa buugag badan oo kaa caawinaayo sida aad u aqoonsan lahayd xaqaada ku qoran sharciga xeerka qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Funded by: / Financé par :
Ontario

Xogwarranka ku qoran qoraaladan waa aragtida hay'adda FLEW sidaa darted dowladda Gobolka mas'uul kama ahan nuxurka qoraaladan.